

Sharraxaada Bisha Taariikhda Dadka Madow: Donna Stoney, oo ah maamulaha kiiska ee Madow ee ugu horreeyay ee ka tirsan nidaamka I/DD ee Degaanka Multnomah

Donna Stoney waxay xasuusataa maalinteedii ugu horreysay ee shaqada ee ay maamulaha kiiska ka noqotay Naafanimada Korriinka ee Degaanka Multnomah waqti Halloween ah sanadkii 1988-kii. “Aad ayaan u naxsanaa, sababta oo ah, aniga ahaan, taasi waxay ahayd shaqo weyn.” Waxay la soo shaqeynaysay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) muddo lix sano ah waxayna soo qabatay “wax kasta” oo dhanka daryeelka tooska ah. Maamulka kiisku wuxuu ahaa meel cusub.



Donna Stoney. Xushmada sawirka waxaa iska leh Sawirrada Kathryn Elsesser

“Aad ayaan u baqayay Weligay ilaami waayo,” ayay Donna sheegtay. Iyada oo ahayd ka mid ah toddobada maamulayaasha kiiska, xafiiskeedu wuxuu lahaa ugu yaraan lix khaanadaha kiiska oo midkiiba leeyahay afar khaanadood oo leh in ka badan 400 oo ah faylasha kiiska. “Waqtiyadaasi wax walba waanu samaynay: wareysiga, carruurta, dadka waaweyn, adeegyada badbaadinta, guryaha koox ahaanta loo degan yahay, daryeelka wax korsiga. Wax walbuu lahaa.” Waqtiga qaarkiis, ma aysan garanayn in ay ahayd maamulaha kiiska ee Madow ee ugu horreeyay ee ka tirsan nidaamka I/DD ee Degaanka Multnomah.

Donna waxay si degdeg ah ogaatay booskeeda shaqada ee bulshada dhexdeeda. Shaqaalaha iyo macaamiishu waxay noqdeen qoys. Waxay heshay sumcad la xiriirta jacaylka iyo dhageysiga dadka, dejinta xaaladaha adag iyo qaadashada kiisaska adag. Sideed sano ka hor, mid ka mid ah kiis noocaas ah oo ku lug yeelatay gabadh yar oo qabta Xanuunka Prader-Willi oo iskaga kala gudbaysay 11 guri. Donna waxay codsatay kiiska oo xasuusatay iyada oo ka fikiraysa, “Waxaan la hadli karaa dadka oo ula dhaqmi karaa sidii ay yihiin qoyskayga oo kale. Kow iyo tobban guri – taasi waa wax lagu qoslo! Waa in aanu joojino habkani joogtada noqday ‘cycle’. Waxaan rabaa in aan joojiyo habka joogtada noqday; taasi waxay qaadataa waqti.”

Waxay guriga koox ahaanta loo degan yahay ee dadka waaweyn ee StoneyBrooke la aasaastay walaasheed, Isku duwaha Adeegada DD ee Degaanka Multnomah ee Val Stoney, si loo daryeelo gabarta yar. Tobannaankii sano ee ka dambeeyay ee taasi oo raacay, Adeegyada Guryaha La degan yahay ee StoneyBrooke wuxuu noqday lix guri oo ku yaala degaannada Multnomah iyo Clackamas.

“Weligay naftayda uma arkin in aan ahay hormuud ‘trailblazer’,” ayay sheegtay Donna. “Tani waa ujeedayda. Waxaan kaliya xiiseynayaa waxa aan jeclahay waxaan qabanayaa waxa aan karo intii karaankayga ah. Waxaan rabaa in aan xaqiijiyo in dadka aan la shaqeeyo loola dhaqmo si cadaalad ah. Nidaamka oo dhan, waxaannu dhammaanteen u baahanahay in la inoola dhaqmo si cadaalad ah.”



Ka soo bilow dhinaca bidix: Val Stoney iyo Donna Stoney. Xushmada sawirka waxaa iska leh Donna Stoney

Donna iyo Val, oo marka la isku daro leh ku dhawaad 80 sano oo waayo-aragnimada dhanka goobta I/DD, waxay ku saabsan tahay qoyska, caddaalada iyo naxariista. Marka la joogo StoneyBrooke, waxay la shaqeeyaan lammaanaha nolosha Donna ee Cory, gabarta ay dhashay ee Dominique, wiilka ay dhashay ee Mikal iyo wiil abti u ah ee Carl.

“!16-kan qof ee guryahayga jooga waa qoyskayga una oggolaan maayo in uu qof qashqashaado iyaga. Waxaan hubin doonaa in ay CAADI wax yihiin,” ayay sheegtay Donna.

Sanadihii la soo dhaafay, Donna waxay keydsatay lacag ay ku taageerto waxyaabaha kale ee ay jeceshahay ee dhanka nolosha: sameynta khamriga. Iyada oo sii wada maamulka

StoneyBrooke, waxay ku laabatay dugsiga si ay u noqoto khamri sameeye iyo qof khamriga aqoon u leh, kaasi oo ah wakiilka khamriga oo ku takhasusay garsoorka iyo isku darka khamriga. Waxay u badan tahay in ay tahay Qofkii Madoobaa ee u horreeyay ee reer Oregon ee guul ka gaara labada ganacsiba halkaasi, “Oo aysan u furfurnayn ruux dumar ah ka dibna Madow,” ayay sheegtay. “Balse waxay la kulmeen Donna Stoney mana joojinayso. Si kasta oo ay tani u adag tahay, waxaan sameyn doonaa tani. Waxaan meesha ka saari doonaa caqabadaha qaarkood. Waxaan rabaa in aan dadka midabyada kala duwan leh ka dhex arko dhismayaasha khamriga lagu sameeyo.”

Si ay u gaarto hadafkani, Donna waxay dhawaan aasaastay Ururka Caalamiga ah ee BIPOC ee Khamri sameeyayaasha. Waxa ka dhexeeya labadeeda wax ee ay jeceshahay: “Labada xirfadoodba waxay ku saabsan yihiin xallinta dhibaata. Isku dayga isku keenista wadajirka iyo kal gacalka. Xiiseynta dhammaan dadka I/DD iyo khamriga. Dhammaan waxay ku saabsan yihiin kal gacal,” ayay sheegtay.

“Waa mid ducaysan waana wicitaankaygii. Marka aad leedahay ruux noocaas oo kale ah. Waa in aad kaliya raacdaa. Waa ujeedayda.”